



# TARTANKA DABEECADDA MAGAALADA 2026

## AAGGA MAGAALADA SEATTLE-TACOMA

Abril 24 – Abril 27, 2026



### DAAWASHADA DABEECADDA KUU DHAW!

Beeraha xayawaanka ee kala ah Woodland Park Zoo, Point Defiance Zoo & Aquarium iyo Northwest Trek Wildlife Park waxay xiiseynayaan in ay caawiyaan in la isku duwo dadka aagga Seattle-Tacoma oo dhan (dhammaan deegaamada Snohomish, King iyo Pierce) si looga qeybgalo dhacdadaan caalamigaa ee daawashada dabeecadda.

**Waa tan sida loogu daro daawashooyinkaaga (indha-indheyntaada) dabeecadda!**



#### 1. KA FURO AKAWN iNATURALIST

Ayadoo la isticmaalayo akawn/koonto iNaturalist ah, waxaad soo gelin kartaa wax la daawado iyo sawirro barnaamijka aab-ka gacanta ee iNaturalist ama kasoo geli kumbuyuutarkaaga oo ku shub bogga khadka iNaturalist (ugu yaraan 13 sano jir waa inuu ahaado si akawn u sameeyo).



#### 2. INDHA-INDHEEH DABEECADDA!

Ka qaad sawirro wax kasta oo noole ah oo aad hesho. Tan waxay noqon kartaa dhir/geed, xayawaan, faangas/baaraabuuq ama wax kastoo kale oo nool! (fadlan hasoo dirin sawirrada rabaayadaha ama xayawaanka beeraha badda iyo birriga.)



#### 3. WADAAG DAAWASHOYINKAAGA

Soo geli sawirrada wixii indha-indheyn ah oo lagu sameeyay aagga Seattle-Tacoma laga bilaabo Jamce, Abril 24 ilaa Isniin, Abril 27 waxaana lagu dari doonaa Tartanka Dabeecadda Magaalada Seattle-Tacoma!



#### 4. KU CAAWI IN LA AQOONSADO AMA WAX BADAN LAGA OGAADO MARKII SAWIRRADAADA LA AQOONSANAYO

Waxaad ka caawin kartaa dadka kale in ay aqoonsadaan indha-indheyntaada, ama khabiirrada ku jira bulshada khadka iNaturalist ayaa caawin kara in la aqoonsado waxyaalaha aad heshay!